IDG Group DMCC

1405 JBC 5, Cluster W, Jumeriah Lakes Towers, PO Box 50784, Dubai, UAE

# SIYAASADDA CABASHADA

MAY 2022

VERSION 3

## VERSION CONTROL

| QAYBTA | SOO BAXAY | QORAAGA | OGOLAANSHA SIIDAYNTA |
|---|---|---|---|
| 1 | AUG 15 | G WINTER | I GORDON |
| 2 | DEC 20 | G WINTER |  |
| 3 | MAY 22 | J PLETT | RONAN BOLGER |
| | | | |
| | | | |

**Table of Contents**

# Contents


**SIYAASADDA CABASHADA** ........ 1

**SIYAASADDA CABASHADA** ........ 3

**1. Baaxadda** ........ 3

**2. Wax ka qabashada cabashooyinka si aan rasmi ahayn** ........ 3

**3. Habka Cabashada Rasmiga ah** ........ 3

Haddii aysan suurtagal ahayn ama aysan ku habboonayn in cabashada lagu xalliyo si aan rasmi ahayn ........ 3

3.1 Marxaladda 1 - Dib u eegista Maareeyaha khadka ........ 3

3.2 Marxaladda 2 - Kormeeraha Maareeyaha ........ 4

3.3 Marxaladda 3 – Maareeyaha Khayraadka Aadanaha ee IDG ........ 4

**4. Dhexdhexaadin** ........ 4

# SIYAASADDA CABASHADA

## 1. Baaxadda

Habka cabashada waa hab rasmi ah, oo uu Shaqaaluhu u soo bandhigo dhibaato ama cabasho ku saabsan xaalad kasta oo  Shaqadooda ah. Habkan waxaa loo qaabeeyey si loo hubiyo in si degdeg ah, oo Caddaalad ah, loo xalliyo cabasho kasta.

## 2. Wax ka qabashada cabashooyinka si aan rasmi ahayn

Haddii ay dhacdo in shaqaaluhu uu damco in uu soo gudbiyo cabasho, waxa ay door bidaysaa in cabashada si lagu qanco oo loo xalliyo sida ugu dhow shakhsiga iyo Maareeyahooda intii suurtagal ah.

Haddii aad qabto cabasho ama cabatin ku saabsan shaqadaada ama dadka aad la shaqeyso, waa inaad meel kasta oo suurtogal ah, aad ka bilowdaa inaad la hadasho Maamulahaaga. Waxaa laga yaabaa inaad awooddo inaad ku heshiisaan xal si aan rasmi ahayn idinka dhexdiinna.

## 3. Habka Cabashada Rasmiga ah

Haddii aysan suurtagal ahayn ama aysan ku habboonayn in cabashada lagu xalliyo si aan rasmi ahayn.

### 3.1 Marxaladda 1 - Dib u eegista Maareeyaha khadka

a) Haddi arrintu tahay mid halis ah iyo/ama aad rabto inaad si rasmi ah u soo bandhigto arrinta waa inaad qoraal ahaan ugu soo gudbisaa cabashada Maamulahaaga. Waa inaad si cad u Qeexdaa xaqiiqada iyo waxyaabaha gaarka ah ee cabashadaada

b) b) Meesha cabashadaadu ay khusayso ee maamulahaaga, si degdeg ah ugu sheeg iyada ama isaga, cabashada waa in loo gudbiyaa kuwa ugu dhow (tusaale Waraadiyaha ama Maareeyaha Mashruuca)

c) Marka cabashada laga keeno maareeye sare (tusaale sida Maamulaha dalka ama Maamulaha hawlaha dalka) markaas cabashada waxaa dhageysan doona Gudoomiyaha.

d) Maareeyuhu wuxuu dhamaystiri doonaa dib u eegista, haddii loo baahdona, wuxuu qabanqaabin doonaa Shir lagu qabto shan maalmood gudahood maalmaha shaqada ah. Shaqaalaha waxaa loo ogolaan doonaa inay sharaxaan cabashadooda iyo sida ay u arkaan in loo xalin karo.

e) Waxa laga yaabaa in uu ku weheliyo saaxiibkaa, kaas oo loo ogolaan doono wakhti macquul ah ku bixiyo si ay ay qaataan waajibaadkooda iyo inay noqdaan wehelkaaga. Doorkoodu wuxuu noqon doonaa inay u dhaqmaan sidii kormeere/taageerayaal. Caadi ahaan door firfircoon kama qaadan doonaan dhegeysiga. Waxaa laga yaabaa inay kiiskaaga kuu gudbiyaan laakiin xaq uma yeelan doonaan inay ka jawaabaan su'aalaha si toos ah laguugu soo diro. Ma jiro wakiil ka socda dibadda IDG looma ogolaan doono inuu ka soo qayb galo dhageysiga gudaha ama racfaanka.

f) Maareeyuhu wuxuu tixgelin doonaa cabashada, wuxuuna samayn doonaa baaritaan dheeraad ah, sida loo baahan yahay. Ujeedada baaritaanka ayaa ah, in la ogaado xaqiiqda dhabta ah, cabashada ka hor inta aan wax go'aan ah la gaarin.

g) Sida caadiga ah waxay ku soo jawaabi doonaan shan maalmood gudohood oo maalmaha shaqada ah. Haddii tani ay ku filnaan weydo, muddo kordhin ayaa labada dhinac ku heshiin karaan.

h) Jawaabtu waxa ay bixinayso waxay noqon doontaa sharaxaad buuxda oo qoraal ah, oo ku saabsan go'aanka iyo xuquuqda rafcaanka.

## 3.2 Marxaladda 2 - Kormeeraha Maareeyaha

a) Waxan filaynaa in Xaaladaha intooda badan lagu xalliyo marxaladda koowaad. Si kastaba ha ahaatee, haddii aadan ku faraxsanayn go'aanka oo aad rajaynayso inaad racfaan ka qaadato, waxaad u gudbin kartaa racfaanka iyo faahfaahin dheeraad ah Maamulaha sare. Tani waxay guud ahaan noqon doontaa maamulida Maamulahaaga.

b) Rafcaanku waa inuu ahaadaa mid qoraal ah, waana in lagu sameeyaa mudo 10 maalmood oo maalmaha shaqada ah, laga bilaabo jawaabta cabashadaada.

c) Dhageysiga Racfaanka wuxuu noqon karaa qaab dib u eegis, laakiin wuxuu qaadan karaa qaab dhageysi dheeri ah. Haddi ay sidaas tahay, waxa lagugu martiqaadi doona kulan Rafcaanka ah, caadiyan shan maalmood gudahood. Waxaad xaq u leedahay in uu kugu weheliyo saaxiibka kulankaas dhegaysiga rafcaanka.

d) .Maareeyahani waxa uu isku dayi doonaa in uu xaliyo cabashada. Jawaabta rasmiga ah, iyo sharaxaad buuxda ayaa lagu bixin doonaa qoraalka todoba maalmood gudahooda ee ka bilaabmaysa wakhtiga Racfaanka la gudbiyay.

## 3.3 Marxaladda 3 – Maareeyaha Khayraadka Aadanaha ee IDG

a) Haddii shaqaaluhu uu sii dhibsadaan waxaa jiri doona heerka ugu dambeeya ee Racfaanka madaxa HR ee IDG. Rafcaankan waa in lagu sameeyaa qoraal, waana in lagu soo lifaaqaa koobiga cabashada asalka ah. Shaqaale kasta oo raba inuu sameeyo rafcaan heerkan ah, waa inuu ku soo gudbiyaa rafcaankiisa oo qoraal ah. muda 10 maalmood oo shaqo gudahooda marka la helo jawaabta heerka 2aad.

b) Madaxa HR ayaa midkood si toos ah u dhagaysan doona rafcaanka ama waxa uu diyaarin doonaa wakiil sare ee maamulka ah, si uu u dhagaysto racfaanka. Waxay siin doonaan racfaanka tixgalin buuxda waxayna si rasmi ah, uga jawaabi doonaan sharaxaad buuxda mudo 15 maalmood oo shaqo gudahood.

c) Marka cabasho ka dhan ah Maareeye sare soo baxdo (sida, Maamulaha Dalka ama Maamulaha Hawlaha Dalka) markaas cabashada waxaa dhegaysan doona Guddoomiyaha.

d) Cabashooyinka ama Racfaanka Marxaladda 3 waa in lagu soo gudbiyaa ciwaanka Emailka hoos ku qoran: grievances@idg-security.com

e) Ma jirto xaq kale oo racfaan. Si kastaba ha ahaatee, haddii labada dhinacba ay ku heshiiyaan in ay jirto waxoogaa faa'iido ah oo loo gudbinayo arrinta dhinac saddexaad si ay talo, heshiisiin ama dhexdhexaadin, ka dib waxaa la diyaarin doonaa si loo helo cid saddexaad oo la wada aqbali karo. Guddoomiyaha IDG, oo la shaqaynaya Madaxa Maaliyadeed, wuxuu si kiis kasta u qoondayn karaa lacag si uu uga caawiyo khidmadaha sharciga ee cabashada.

## 4. Dhexdhexaadin

Dhexdhexaadinta gudaha haddii ay jirto cabasho waxay noqon kartaa beddel waxtar leh, oo loo beddelayo nidaamka cabashooyinka rasmiga ah. Markay ku habboon tahay iyo marxalad kasta oo habsocodka, labada dhinacba waxay codsan karaan in arrintu ay hoos timaado dhexdhexaadin. Dhexdhexaadintu waxay ku lug leedahay qof madaxbanaan, oo aan eex lahayn oo la shaqaynaya labada dhinac si xal loo helo.

Dhexdhexaadintu maaha qayb ka mid ah nidaamka cabashada rasmiga ah ee IDG. Si kastaba ha ahaatee, haddii labada dhinacba ay ku heshiiyaan dhexdhexaadinta, markaa habka cabashada waa la hakin karaa si loogu xalliyo cabashadooda habkaas dhexdhexaadinta. Haddii dhexdhexaadintu ay guulaysan waydo, markaa nidaamka cabashada dib ayaa loo bilaabi karaa. IDG waxay siin doontaa dhexdhexaadin gudaha ah, shaqaale kasta oo raba inuu wax ka qabto cabasho la soo sheegay waxaana laga yaabaa in duruufo gaar ah ay aqoonsato dhexdhexaadiye dibadu.

Codsiyada dhexdhexaadinta waxaa loo gudbin karaa ciwaanka Emailkan
grievances@idg-security.com.